


Warbixin Gaar ah:

Xubnaha Jidhka Reer Somaliland oo lagula baxo Dhakhtarada Ethiopia!
Dhagdheerta casrigan oon cidiba ogayn!



Dhakhtaro Ethiopian ah qalliin ku jira (bidix) Xubin Kelli iib ah (midig)

Cabdinaasir Aadan Dhuxul * waa muwaadin ku nool caasimadda JSL ee Hargeysa, dabayaaqadii sannadkii 2010 ayyaa Qaddar Alle dartii waxa qabtay xanuun kaasoo ka haleelay Uurka-Jirta isla mar ahaantaana markuu meel xun gaadhay wuxuu go'aansaday inuu dhakhtar u tago magaalada Herer ee Ethiopia. Wuxuu islamarkiiba abbaaray goobihii Dhakhtarka khaaska ah ee looga soo tilmaamay Hargeysa. Cabdinaasir waxa laga markiiba loo sheegay in "qabsin uu caloosha ka helay, qalliin degdeg ahna lagu samaynayo". Waxa laga qaddimay lacagt Ethiopian Birr u dhiganta \$1'850 USD... Cabdinaasir halkii ayyuu ku saxexay warqaddii Fasaxa Qalliinka isagoo ku farxay in ugu dambeyn la helay xanuunkiisii. Saacaddu markay ahayd 11:30 aroornimo ee 3dii November 2010 ayyaa lagu saaray Qolka Qalliinka (Operation Theatre) ee dhakhtarka Herer-Ethiopia, halkaas oo muddo 3 saacadood ah uu miyir la'aa isla mar ahaantaa markuu soo miirabayna loo sheegay in "qabsinkii laga jaray, lana tusay nabarka laga soo gooyay oo dhinac yaalla"!!!



Halkii Kalli ahi waa \$25kun -- \$50kun isku celclis qiimaha adduunka laga siisto

10kii November 2010 ayyuu Cabdinaasir markii uu yara nastay lana baxnaaniyay u soo ambabaxay Hargeysa halkaas oo uu muddo joogay isaga oo aad ugu niyad samaa in cudurkii Ilaahay sidaa kaga samatabixiyay. Haddaba muddo toddobaadyo kadib, ayyaa Cabdinaasir isku arkay madax-xanuun, dawakhaad, kaadi badan, Kelyo-xanuun dhinaca midig u badan oo aanuu hore isugu arki jirin. Wuxuu gaadhay in xaalkiisu sidii hore uga sii daro oo uu wax hurdo ah ladi waayo. Cabdinaasir wuxuu go'aansaday inuu u tago Dhakhtaar khaas ah oo ku yaalla Hargeysa si uu uga waraysto xaaladdan khatarta ah ee ku timid maadaama oo uu "qabsinkii iska soo jaray" garanna la'yahay rooxaantan wali ka sii laalaada!!

Bishii December dabayaqaadeedii ayyuu dhakhtarkii khaaska ahaa ee Hargeisa u qabtay ballan, kadib baadhitaan guud, waxa Cabdinaasir loo sheegay warkii ugu naxdinta badnaa noloshiisa. Cabdinaasir waxa loo sheegay in **Kallida midigta ay dhammaanba ka maqantahay** isla mar ahaantaana wax caddayn ah in ay bukaan ahayd aanu jidhkiisa ka muuqan iyo waliba baadhintaakii kaadidiisa.

Cabdinaasir waxa isla markiiba ugu soo dhacday xasuustiisa sidii degdega lahayd ee Dhakhtarka Ethiopia ahi markiiba go'aanka qallinka ugu sheegay ee u yidhi "Qalliin degdega ayyaad u baahantahay" Wuxuu xasuustay dadkii dhammaan uu kula kulmay dhakhtarka Herer sida Maxamuud Cali (30 jir, Burco), Hooyo Canab Ismaaciil (38 jir Hargeisa, lehna 6 caruura), Ibraahim Cali (50 jir Laasqoray, lehna 7 caruura) iyo dhammaan dadkii kuyuuga ku jiray dhammaantood ay wada ahaayeen Qalliin-sugayaal, iyadoo intaba loo sheegay in "**caloosha qabsin laga jari doono**". Waxa markiiba ku soo dhacday in intaas iyo inta ka badan ee maalin walba lagu qalo dhakhtarada Ethiopia ay yihiin goobo lagu qasho laguna kala ganacsado xubnaha dadka Soomalida ah ee Reer Somaliland waliba u badan oo iyagu aan warba ka hayn.

Cabdinaasir ma garanayo dhakhtarkii qalay iyo muuqaalkiisu siduu u ekkaa, mana **caddayn karo** in Ethiopia lagula baxay xubintiisa maadaama uuna qoraal hayna, waayo maafiyadu way kasii gaashaamataa in dib laga soo ogaado. Ogsoonow in qofka laga jari karo wax "qabsin u eeg" oo jidh kasta oo banii aadama ku jira si la isku daad-raaciyo in wax laga gooyay, laakiin ujeedadu waa Kallida (the big price). Cabdinaasir waxa uu ku suganyahay Hargeisa isaga oo u arka inuu bohool isku riday qaddarna haleelay, waxayse digniin u tahay inta kale ee wali ku qulqulaysa Ethiopia si "caafimaad" ay u soo helaan.

Fadlan Ogsoonow in Kallida kaliya ee jidhka Cabdinaasir lagala baxay qiimaheedu uu marayo \$50'000 (konton kun oo dollar iyo wixii ka sarreeya).

Akhristow haddaad maanta la xidhiidho wadankii oo arrintan aad waraysato waxa fududaan karta inaad ogaato qaraabo ama qof aad garanayso ama qof uu qofkaasii sii garanayo oo Ethiopia u tagey dhakhtar halkaas oon la garnaayn wuxu kala soo kulmay inay tahay masiibadaa Cabdinaasir la kulantay iyo inkale, illeen sida lagu ogaadaaba way adagtahay. Dhakhtaradu waxay sheegaan in dadka lagala baxo xubnaha jidhka ayba u badanyihiin dad aan is ogayn, maadaama dadka qaar jidhkoodu inta hore oo dhan u adkaysan karo, laakiin mar dambe ay ku soo bixi doonto taasoo sababta badankeedu in uu qofku u dhinto marka dambe.

Waxa xusid mudan in haddii maanta madaxu ama calooshu ku xanuunaan oo aad Ethiopia dhakhtar u tagto, lagu odhan doono "**Qalliin ayyaad u baahantahay**"!. Waxaad ogaataa in xattaa haddii aad nasiib leedahay oo aan lagaala bixin xubin (waliba way yartahay!) ay ujeedadu tahay in lacag qaalli ah oo Qalliin Operation lagaaga qaado . Tan dambe ee lacagdoonka qaallinka waa dhibta ugu yar, laakiin waxa badan in halkaas aad kala hulleesho adigoo Kelli ama xubin kaleba lagaala baxay sida dumarka oo iyaga Ilma-galeenkoodu uu aad xaami u yahay isla mar ahaantaana la hayo dad badan oo garan la'sababta ay ubad usii dhali waayeen kadib markay tageen dhakhtarada Ethiopia!

Arrintan iyo sida loogu baraarugsanyahay ayyaa haba yaraatee markaan u kuur galnay aanu ogaanay in dawladda JSL aanay wax wara ka hayn, isla mar ahaantaan wax wacyigalin iyo digniin ahi aanu ka jirin.

Dhawaan ayay ahayd markii uu Wasiirka Caafimaadka Dr. Xoog ka hadlayay in dadku cudurada lagaga daweeyo Ethiopia ay qiimo jaban wadankooda kaga heli laahyeen, isagoo dadka kaga cabnayay oo lahaa "dadku markay Ethiopia tagaana qiimo walba way bixiyaan, markay Hargeisa joogaana waa inamadaydii ee waxba bixin mayno yidhaahdaan" ayyuu yidhi isagoo aad moodo in runtii ogaalkiisa qiimaha uu uga muhiisanyahay in uu Ummadda ka baraarjiyo dad-qalatada ka dillaacday dhakhtaradan oo xubnahooda lagula baxo.

Suuqa Xubnaha iyo Macluumaad ku saabsan:

Hay'ada Caafimaadka aduunka ee magaceeda loo soo gaabiyo WHO waxay sheegtay 5% oo u dhiganta 70'000 (todobaatan kun) oo xubnaha jidhka bini'aadamka in lagu kala iibsaday Suuq Madow iyadoo sidoo kale ay kordheen kumanaanka kun ee qof ee baadi goobaya iibsiga xubno jidh bini'aadam oo iyaga ay kuwoodii ka haleeleen cuduro kala duwan




Wadamada dunida ugu badan ee sida joogtada ah ee isdabajooga ah sida tusbax afka laga furay xubnaha jidhka bini'aadamka loogu kala iibsado suuqa waxaa ugu horeeyaa Brazil, Hindiya, Moldova, Romania iyo Filibiin, sidoo kale bariga dhexe waxaa ugu badan Turkiga Masar, waxaase hada suuqa kala iibsiga xubnaha jirka bini'aadamka soo galay dalalka Ciraaq iyo Falastiin.

Waxaad moodaa wadamadaas in Ethiopia ay hadda ku soo biirtay oo Soomalida usoo dhigatay (siiba Reer Somaliland oo si sida MCH-xaafadeedka loo tago u taga Ethiopia imika.

Xubnaha ugu sarreeya iyo qiimaha ay marayso addunka celcelis ahaan:

- Wadnaha.....(\$50kun—illaa--\$90kun),
- Kelyaha(\$25kun—illaa--\$50kun),
- Beerk.....(\$30kun—illaa--\$70kun)
- Sambabada(\$25kun—illaa--\$50kun)
- Mindhicirka(\$25kun—illaa--\$50kun)
- Thymus-ka(\$10kun—illaa--\$30kun),
- Ilma-galeenka..... (\$35kun—illaa--\$100kun),



Waddamada ugu horreeya:

- Asia:** Hindiya, Pakistan, Iiraan, Ciraaq, Filibiin, Kuwait
- Afrika:** Nigeria, **Ethiopia**, Masar, South Africa
- Latina America:** Brazil, Mexico, Carribeanka
- Europe:** Romania, Jamhuuriyadii hore ee USSR

Wadamada Faqiirka ah ayyaa lagala baxaa waxana laga iibiyaa kuwa qaniga sida reer Galbeedka:

95'000 waa Kelli sugayaal Maraykanka ah

65'000 waa Kelli sugayaal Yurub ah

WHO waxay sheegaysaa in 70'000 kun ee qalliinka xubnaha ee sannad walba, ugu yaraan shan meeloodow meel ay tahay Suuqa madaw (waa kan Ethiopia oo kale eh).

Maxaa Xal ah:

- 1) In dadka xanuunada u tagaya Ethiopia la daba galo dhakhtarada ay tagayaan
- 2) In dawladdu ay dadka u tilmaamto in dalka intii lagu daweyn karo aanay lacag iskaga khasaarin galaafan karta xubnahooda jidhka
- 3) In dalku maadaama uu xoryahay safarka, ganacasigu iwm, laga wacyi galiyo, isla mar ahaantaana loo sheego hadday ikhtiyaar ku tagaa Ethiopia, in ay tagaan dhakhtrada la aqoonsanyahay ee la daba gali karo (tusaale iyadoo list- loo sameeyo kuwa aan dambigana lugta ku lahayn (List of Safe hospital in Ethiopia)
- 4) In warbaahinta gudhu sida Radio Hargeisa ay dadka wacyigalin xooggan ka siiso xubnahana lagala soo baxayo Ethiopia ee ay mooggan yihiin wali!
- 5) In Wasaaradda Caafimaadku waajibbeedkeeda ku aaddan arrinta argagaxa leh ay gudato
- 6) In qof kastoo qurbaha jooga aanu u dirin dadkooda Ethiopia si loogu soo daweeyo maadaama dada qalato ka dillaacday (waliba xogogaal waxaan u ahay in dawooyiinka UK loo soo dirsado ee dhakhtaradaasi qoreen ay aad xaammi u yihiin muddooyinkan dambe iyadoo Fax- lagu soo diro!!

Intaasi waa inta igu soo dhacday shakhsiyani ee fadlan ku soo darso talada arrinta waa masiibo qarane!

Nin kuu digay kuma dilin eh, Cabdinaasirada dambe ha la dabo qabto.

Mustafe-Caafi Axmed

UK

caafi82[at]hotmail.com

* Fiiro gaar ah: Qisada Cabdinaasir ku dhacday waa qiso dhab ah oo dad aanu qaraabo nahay ay garanayaan dhibanahaas ayna iyagoo Hargeisa jooga iiga sheekeeyeen qabtan ku habstay muwaadinkan Ilaahay ha u gargaare. Magaca waxa aan loo muujin si loo dhawro khusuusiyaadiisa.

Ref:

<http://news.bbc.co.uk/1/hi/scotland/7493466.stm>

<http://arirusila.wordpress.com/2009/03/02/new-cannibalism-in-europe-too/>

http://en.wikipedia.org/wiki/Organ_trade

<http://lughaya.com/2009/11/19/suuqa-kala-iibsiga-xubnaha-jidhka-dadka-oo-hawada-isku-shareeray/>